

IIB MA GALO

FAAFINTA

الجريدة



RASMIGA AH

الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 25 Maarso 1981 L. 2, r 3

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D S

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga
oo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo
waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta
Maamulka Faafinta Rasmiga ah — laagta waxaa lagu bixinayaa

Yafteka Canshuuraha ee Wanaarada laagta

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

SHARCI: L. 15 ee 22 Jen. 1981, Miisaaniyad
da ku talo galka ee Sannadka 1981.

BOG. 405

QAYBTA

LABAAD

XEER

W. M.

QAYBTA

SADDEXAAD

TALOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI LAMBAR 15 TAARIIKH 22 JEN. 1981
MIISAANIYADDA KU TALO GALKA EE SAN. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: 'Oggolaashaha Golaha
Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo uruuri
so Dakhliga iyo in ay bixiso Kharashka ku qoran Mii
saaniyadda halkan ku lifaaqan iyadoo la raacayo xeera
rka, habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaa
dka iyo Hantida Dawladda.

Qod. 2aad

1. Isbeddelka Guud ee Miisaaniyadda iyo kuwa ku saa
bsan madaxyada Miisaaniyadda waxaa lagu soo
saarayaa Sharci.
2. Kala wareejinta ku saabsan Madax xigeennada isku
madax ah waxaa awood u leh Wasiirka Wasaarad
da Maaliyadda isagoo dhegeystay soo jeedinta Wa
siirka Wasaaradda ay arrintu khusayso.
3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada
madax xige walba ee Miisaaniyadda Dawladda Dhe
xe waxaa awood u leh Wasiirka Wasaaradda walba
kale wareejinta ceynkan oo kale ah ee Miisaaniyad
da Dawladaha Hoose waxaa awood u leh Guddoo
miyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka.

Qod. 3aad

Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay
inuu Keyd ka dhigo haddii loo baahdo dhammaan ama
qeyb ka mid ah Lacagta ku jirta madax xige walba ee
Miisaaniyadda.

Qod. 4aad

Waxaa la baabi'iyay Sharci kasta oo ka soo horjee
da ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa Ida Jennaayo
1981 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga
ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Jen. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOMALIYA

WASAARADDA MAALIYADDA

WARBIXINTA MIISAANIYADDA 1981.

J/Le Guddoomiye,

Jaallayaal,

Waxa ii sharaf ah, waajib dastuurina igu ah, danta maamulka Dawladduna ay igu qasbaysaa, in Golaha sharafta leh aan horkeeno Miisaaniyadda sannadka soo socda 1981ka, anigoo codsanaaya in nalo guddoomiy³.

MIISAANIYADDA DAWLADDA DHEXE:

Sida aad u aragtaan Miisaaniyadda 1981, kharashkeeda guud waxa weeye Sh. 2.943.228.210-00, dakhligii lagu dabooli lahaana waxa weeye Sh. 2.943.228.210-00. Sida aad u aragtaan waxa weeye Miisaaniyad ay is waafaqsan yihiin dakhligiyeeda iyo kharashkeeda.

Dakhliga iyo kharashkuba waxay ku fadhayaan xisaab si dhab ah loo darsay lagana taxadaray in is-dhimid ayna dhicin, in kharashka dib loo dhimo shaqadii loogu talo galayna ay curyaanto, ama Bankiga Dhexe Miisaaniyadda laga kabaa, sidii horeba ay u dhici jirtey taas oo aan ognahay dhibaataada weyn ee ay u keeni jirtay qiimaha shilinka Soomaaliyeed ama ascaarta Dalka gudihiisa.

Miisaaniyaddu waxay u qaybsantahay saddex meelood, kuwaasoo ah:-

- b) Mushaharka guud ee Shaqaalaha Dawladda iyo gunnacyinka la xiriira, oo dhan Sh. 1.335.002.962-000 .
- t) Makhaasiirta maamulka (general services), taasoo cadadeedu tahay Sh. 1.303.003.920-00 .
- j) Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, masharicda la xiriirta, kharashka ku baxayana uu yahay Sh. 305.221.328-00.

Inkastoo Miisaaniyadda sannadka 1981ka ay ka badan tahay tii sannadkii hore, haddana waa Miisaaniyad ku dhisan tashiil makhaasiireed iyo dakhligoo lagu dadaalay inuu noqdo mid lagu kalsoon yahay inuu soo geli doono. Waxaan xoogga saaraynaa, annagoo haddaba ku jirna dib u habaynta iyo xoojinta Xafiisyada cashuuraha gura, in dakhliga Dawladdu ku soo galaa sida xaqqu uu yahay oo aan la dagaalanna tuugada iyo doc-marinta cashuuraha Dawladda,

Dib u habaynta iyo xoojinta Xafiisyada Wasaaradda Maaliyadda ee ku shaqa leh cashuuraha ka sakow, Xoogga Boliisku qorshayn iyo qayb-ka-qaadasho intii hore ka weyn ayuu farsamo gelinayaa, taasoo keeni doonta in ciidan Boliiska ka mid ah uu khaas u noqdo ilaalinta cashuuraha Dawladda oo si toos ah ula shaqayn doona Wasaaradda Maaliyadda. Tababarro joogta ah ayaa furnaan doona, iyadoo loogu faa'iideynayo aqoon korodhsiga shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda iyo kooxdaas Ciidanka Boliiska ah si ay u gutaan waajibaadkooda iyagoo u leh aqoon buuxda.

Dabcan, inkastoo kooxdaas ka mid ah Ciidanka Boliiska ay u go'naan doonto nabadgelinta cashuuraha Dawladda, Ciidanweynaha Boliisku kama reebana, waajib bayna ku ahaan doontaa inay isku taxallujiyaan la-dagaalanka kantarabaanka iyo cashuur-la-fakadka, iyagoo u soo gudbinaya wixii ay qabtaan Xafiisyada cashuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda ama Saldhigyada Boliiska ee u khaaska ah ilaalinta cashuuraha.

Miisaaniyaddan, kharashkeedu waxa weeye mid loogu talagalay inuu ku fillaado hay'ad walba ee Dawladda ka mid ah oo aan dib dambe u dhicin kabitaan caadi ah oo yimaada kaddib markii ay Miisaaniyaddu dhaqan gasho haddii aanay soo bixir dhibaatooyin aan caadi ahayn oo kallifta dib ugu noqod isbeddel miisaaniyadeed.

Makhaasiirtii caadiga ahayd ee sannad walba ka muuqan jirtay waxa ku siyaaday waxa ugu weyn mushaharka shaqaalaha Dawladda oo ka timid mushahar-kordhintii Madaxweynuhu ku dhawaaqay maalintii sannad guurada Kacaanka Oktoobar ee la soo dhaafay. Mushahar-kordhintaas waa wax shaqaaluhu aad ugu ugu baahnaa muujinaysana daryeelidda Kacaanku uu u hayo shaqaalaha Dawladda, mid qalab sida iyo mid kaleba, waxayna ahayd baahi lagama maarmaan ah.

Miisaaniyaddii 1980ka, kharashkeeda guud wuxuu ahaa sh. 1.788.021.198,00 iyadoo sida aan u sheegnay markay dhaqan gashay kadib u baahatay kabitaan xoog leh oo ahayd mid caadi ah, mudnaydna in horey loogu talo galo. Sannadka 1981ka, kharashka Miisaaniyadda loogu talo-galay waxa weeye sh. 2.943.228.210-00 kharashkaasoo u kala baxa kharashka shaqaalaha oo ah sh. so. 1.305.774.386-00 una dhigma 47,43%, kharashka maamulka guud (general services) sh. 1.242.232.496-00 una dhigma 42,2%; kharashka horumarinta dhaqaalaha iyo u daryeelidda bulshada, maamulka shaaricda la xiriirta sh. 305.221.328/= una dhigma 10,37%.

Dakhliga sannadka 1980ka wuxuu ahaa sh. 1.956.120.000/ , si xoog lehna waa ugu hoos maray wixii la filayey inay soo galaan, sababta oo ah wax soo saarkii gudaha iyo wax ka soo dejintii dibedda oo labaduba ay hoos u dhaceen; hase yeeshee eedda ugu weyn waxa lahaa ururintii cashuurta oo aan loo qaadin si buuxda. Sannadka 1981ka dakhliga guud waxa weeye sh. so. 2.943.228.210-00 waxaana ku kalsoonahay dakhligaas ku talagalka ihi inuu soog galaa annagoo ku isticmaali doona awoodda iyo naadamka is-xil-qaamiska ah ee aan kor ku soo sheegnay. Meelaha ugu waaweyn waxa ka mid ah cashuuraha furdada ka soc galaya; cashuuraha warshadaha Dalka oo qaybta ugu ballaaran ay ka imaan doonto labada warshadood ee soo saara sonkorta; sagnaankahay tarraqa (State monopoly items); cashuuraha iyo qaybta faa'iidada ee wakaaladaha Dawladda; cashuurta macaashka ganacsatada

iyo maal-qabeenada ku waajibtay sannad kasta, taasoo xoog weyn la saari doono si dakhligeedu si dhab ah isku beddelo.

MIISAANIYADAAHA WAKAALADAAHA:

Miisaaniyadda cusub waxa ka muuqda dakhliga iyo kharashka ee Wakaaladaha, kuwaasoo Wasaaradda Maaliyaddu ay kala dooday madaxda hay'adahaasi horumarinta dakhligooda iyo makhaasiirtooda caadiga ah oo aad loo dhimo. Sida la og-yahay dhibaatooyin xoog leh ayaa ka taagan maamulka Wakaaladaha badidood waana lagama maarmaan in dib loo habeeyo si ay u yaraato maamul xumada haysata badidood, iyo dhibaataada Qaranka ka soo gaarta. Wakaaladaha sidaa ugu sii dheeraan maayo, waxaanse doonayaa inaan muujiyo Wakaaladaha kharashkooda caadiga ah in aan aad hoos ugu dhigno.

MIISAANIYADDA DAWLADAAHA HOOSE

Sida Goluhu uu xog-ogaal u yahay, doorashadii dhoweyd ee Qaranka ka dhacday kaddib, waxa la dhisay Golooyin deegaan, sharcigii ay isku maamuli lahaayeen Golaha Shacbiga Qaranku waa uu guddoomiyey sannadkan bilawgiisii.

Dakhliga iyo kharashka Dawladaha Hoose waxay ku cad yihiin Miisaaniyadda; iyadoo la tixgeliyey baahidooda iyo dakhligoodaba, kuwaasoo ku jaan go'an xisaabtan dhab ah.

Dakhliga guud ee Dawladaha Hoose ay filii karaan inuu soo galo cadaddiisu waxa weeye Sh. 193.842.000/=, kharashka ku bixi doona sannadka socda asaguna waxa weeye Sh.222.269.000/=, Farqa u dhaxeeya labada xisaabood oo ah Sh. 28.427.000/= waxa laga kabayaa Miisaaniyadda Dawladda Dhexe.

HABKA IYO SIYAASADDA MIISAANIYADDA
& ILAALINTA QIIMAHA SHILINKA.

Sida aan kor ugu soo sheegnay, Miisaaniyadda sannadka soo socda waxaan ku qorshaynay in kharashkeeda iyo dakhligeedu is-daboolaan si aynan u dhicin in Bankiga Dhexe uu ku dal-dalo bixin kharash aan dakhli loo haynin.

Qiima jabka shilinka Soomaaliyeed iyo ascaarta bararta sababaha keena waxa ugu waaweyn Dawladda oo si joogta ah Bankiga Dhexe uga gurata deyn ay ku kabayso kharashka ka dhiman dakhligiyeeda dhabta ah, taasoo ciriiri gelisa nolosha shacbiga iyo lacagta oo qiima beesha. Dawladdu aad bay uga digtoon tahay inay ku isticmaasho habkaas dhaawac weyn u keenay nolosha dadka; curyaamiyana korumarka dhaqaalaha Dalka. Miisaaniyadda Dawladdu haddii ay ka baxdo xadka dakhligiyeeda, dhibaatooyinkaas aan kor ku soo sheegnayna way iman, Miisaaniyadda dibeddana nabar weyn bay gaarsiin, taasoo sii kor-dhinaysa wax-yeellada qiimaha shilinka Soomaaliyeed. Saa awgeed, waa lagama maarmaan in Miisaaniyadda Dawladdu ay isku fillaato.

Dawladda Dhexe waxay ka qabtaa Bankiga Dhexe lacag cadadeedu ay kor u dhaaftay laba bilyan, taasoo ay ka timid horumaris isku biiray oo Bankiga Dhexe Dawladda siin-hayey sababtoo ah in Dakhliga Miisaaniyaddu ku fillaan waayey kharashkeeda. Deynkaas Dawladda Dhexe ay ka qabto Bankiga wa-xaan ku talo jirnaa in hab lagu xalliyo loo dejiyo.

Ilaalinta qiimaha shilinka Soomaaliyeed waa u daryeelidda nolosha shacbiga Soomaaliyeed, Dawladdu way ku dadaali doontaa xoojinta shilinka Soomaaliyeed iyadoo dhinacna ka taxadari doonta in Miisaaniyaddu aanay sabab u noqon qiimadhaca shilinka dhinac kalena ku dadaali doonta wax-soo-saarka, kaasoo wax ka tari doona ganacsiga dibedda iyo gudahaba.

HORUMARINTA DHAQAALAHA:

Lacagta qiimaheedu micna kuma fadhiyo haddii aan dhaqaale jirin, maadaama lacagta doorkeedu u yahay tii la isku weydaarsan-hayey waxa la soo saaro ee dadku u baahan yahay in la is dhaafsado.

Dhaqaaluhu ma kobci karo haddii aysan jirin siyaasad korumarin dhaqaale. Horumarin dhaqaale waxay u baahan tahay hab lagu geesi geliyo tacabka iyo wax soo saarka, habkaasoo wejiyo badan yeelan kara oo ay ka mid yihiin dhiiri gelin la siiyo shicib-weynaha beeraleyda ah, xoola-dhaqatada iyo Warshadaha (encouragement of private sector); in gacan la siiyo hay'adaha Dawladda ee wax soo saara. Dhiiri gelinta horumarinta dhaqaalaha waxa ka mid ah in xubnahaas loo sahlo amaah korsaarkeedu hooseeyo, aan loo yeelan ciriiri gelin wax u dhinta wax-soo-saarkooda, in loo gooyo ascaar geesi gelisa oo aan qasab ahayn, ganacsiga dibedda loo dirayana garab wax tar leh la siiyo.

Geesi gelinta kobcinta dhaqaalaha, miisaaniyadda dibeddana waa ay siyaadin, ascaarta gudahana hoos bay u dhigi ama kor-u-kiciddooda ayey soo gaabin, taasoo dhali-naysa in shilinka Soomaaliyeed uu xoog yeesho. Isla mar-kaa waxa suuro gal noqon kara in laga baxo hakka ascaarta-nada sida xad dhaafka ah kor ugu kicisay ee loo yaqaan franco valuta oo markaa ganacsiga dibeddu uu si caadi ah u maro xiriirka is-dhaafsiga ganacsiga ee bunuugtayada iyo adduunka.

Siyaasadda Miisaaniyaddu waxay noqonaysaa inay geesi geliso horumarka dhaqaalaha Dalka, iyadoo fiiro gooni ah loo yeelanayo kordhinta wax soo saaraka. Sannad kesta si joogto ah ayay Dawladdu ahmiyad gaar ah u siin doontaa siyaasadeeda cashuuraha, la dagaalanka bararka ascaarta, kobcinta dhaqaalaha, si shicibka Soomaaliyeed uu u gaaro horumar dhaqaale iyo mid bulshaba.

Waad mahadsanithiin.

MIISAANIYADDA DOWLADDA DHEXE

MADAX-XIGE	T I L M A A N	1980 QIYAASTA	1981 QIYAASTA	FARAQ
1.1.0	<u>CASHUURTA KHARASHKA</u>			
1.1.1	Cashuurta keenidda alaabta	850.000.000	930.000.000	+ 80.000.000
1.1.2	" diridda alaabta	16.000.000	16.000.000	-
1.1.3	" maamulka & tirada	210.000.000	230.000.000	+ 20.000.000
1.1.4	" diiwaangelinta	60.000.000	60.000.000	-
1.1.5	" moorka	150.000.000	157.000.000	+ 7.000.000
1.1.6	" soodaaalka baabuurta	4.000.000	4.000.000	-
1.1.7	" kale ee dadban	8.000.000	8.000.000	-
		1.298.000.000	1.405.000.000	+ 107.000.000
2.1.0	<u>CASHUURTA WAX SOO SAARKA</u>			
2.1.1	Cashuurta sonkorta & khamriga	200.000.000	428.000.000	+ 228.000.000
2.1.2	" buuriga & taraqa	30.000.000	30.000.000	-
2.1.3	" oabitaanka	18.000.000	18.000.000	-
2.1.4	" kale ee wax soo saarka	4.000.000	4.000.000	-
		252.000.000	480.000.000	+ 228.000.000

MIISAANIYADDA DOWLADDA DHEXE

MADAX-XIGE	T I L M A A N	1980 QIYAASTA	1981 QIYAASTA	FARAQ
3.1.0	<u>CASHUURTA DAKHLIGA</u>			
3.1.1	Cshuurta caadiga ah ee dakhliga shaqaalaha	35.000.000	35.000.000	-
3.1.2	" macaashka	5.200.000	5.200.000	-
3.1.3	" horumarinta dhaqaalaha	35.000.000	35.000.000	-
		75.200.000	75.200.000	-
4.1.0	<u>WAREEJINTA KALE EE GUDAHA</u>			
4.1.1	Ganaaxa & wareejinta qaabka ah ee kale	1.000.000	1.000.000	-
4.1.2	Wareejinta khiyaarka ah	-	-	-
4.1.3	" kale ee joogtada ah	-	-	-
		1.000.000	1.000.000	-

MIISAANIYADDA DOWLADDA DHEXE

MADAX-XIGE	T I L M A A N	1980 QIYAASTA	1981 QIYAASTA	FARAQ
5.1.0	<u>DAKHLIGA HANTIDA DOWLADDA</u>			
5.1.1	Dakhliga ruqsadda dhulka	300.000	300.000	-
5.1.2	" " kale	600.000	600.000	-
5.1.3	Cashuurta gedista ee Wakaaladdaha Dowladda	135.000.000	189.442.636	+ 54.442.636
5.1.4	Qaybta Dowladda faa'iidada Wakaaladaha	150.000.000	113.665.574	- 36.334.426
5.1.5	Daymanka ku maqan Wakaaladaha	-	626.000.000	+ 626.000.000
5.1.6	Korsocodka	5.000.000	4.000.000	- 1.000.000
		290.900.000	934.008.210	+ 643.108.210
6.1.0	<u>DAKHLIGA ALAABTA & HOWSHA</u>			
6.1.1.	Ajuurada Dekedaha	-	-	-
6.1.2.	" Gagida Dayuuradaha	2.500.000	2.500.000	-
6.1.3.	Dakhliga Boostada	3.720.000	3.720.000	-
6.1.4.	" Taararka	7.000.000	8.000.000	+ 1.000.000
6.1.5.	" Telifoonada	12.000.000	6.000.000	+ 6.000.000
6.1.6.	" Telekiska	12.000.000	12.000.000	-
6.1.7.	" Dugsiyada	600.000	600.000	-
6.1.8.	Faafinta & Iidhehda	200.000	200.000	-
6.1.9.	Ajuurada Nootaayada	2.000.000	4.000.000	+ 2.000.000
6.1.10.	" Diiwaangelinta Maraakiibta	-	-	-
6.1.11.	Dakhliga Gadidda Alaabta	700.000	700.000	-
6.1.12.	" Kale Alaabta & Howsha	300.000	300.000	-
		29.020.000	38.020.000	+ 9.000.000

MIISAANIYADDA DOWLADDA DHEXE

MADAX-XIGE	T I L M A A N	1980 QIYAASTA	1981 QIYAASTA	FARAQ
5.1.0	<u>DAKHLIGA HANTIDA DOWLADDA</u>			
5.1.1	Dakhliga ruqsadda dhulka	300.000	300.000	-
5.1.2	" " kale	600.000	600.000	-
5.1.3	Gashuurta gedista ee Wakaaladdaha Dowladda	135.000.000	189.442.636	+ 54.442.636
5.1.4	Qaybta Dowladda faa'iidada Wakaaladaha	150.000.000	113.665.574	- 36.334.426
5.1.5	Daymanka ku maqan Wakaaladaha	-	626.000.000	+ 626.000.000
5.1.6	Korsocodka	5.000.000	4.000.000	- 1.000.000
		290.900.000	934.008.210	+ 643.108.210
6.1.0	<u>DAKHLIGA ALAABTA & HOWSHA</u>			
6.1.1	Ajuurada Dekedaha	-	-	-
6.1.2	" Gagida Dayuuradaha	2.500.000	2.500.000	-
6.1.3	Dakhliga Boostada	3.720.000	3.720.000	-
6.1.4	" Taararka	7.000.000	8.000.000	+ 1.000.000
6.1.5	" Telifoonada	12.000.000	6.000.000	- 6.000.000
6.1.6	" Telekiska	-	12.000.000	+ 12.000.000
6.1.7	" Dugsiyada	600.000	600.000	-
6.1.8	Faafinta & Iidhehda	200.000	200.000	-
6.1.9	Ajuurada Nootaayada	4.000.000	4.000.000	+ 2.000.000
6.1.10	" Diiwaangelinta Maraakiibta	-	-	-
6.1.11	Dakhliga Gadidda Alaabta	700.000	700.000	-
6.1.12	" Kale Alaabta & Howsha	300.000	300.000	-
		29.020.000	38.020.000	+ 9.000.000

MIISAANIYADDA DOWLADDA DHEXE

MADAX-XIGE	T I L M A A N	1980 QIYAASTA	1981 QIYAASTA	FARAQ
3.1.0	<u>CASHUURTA DAKHLIGA</u>			
3.1.1	Oshuurta caadiga ah ee dakhliga shaqaalaha	35.000.000	35.000.000	-
3.1.2	" macaashka	5.200.000	5.200.000	-
3.1.3	" horumarinta dhaqaalaha	35.000.000	35.000.000	-
		75.200.000	75.200.000	-
4.1.0	<u>WAREEJINTA KALE EEE GUDAHA</u>			
4.1.1	Ganaaxa & wareejinta qaabka ah ee kale	1.000.000	1.000.000	-
4.1.2	Wareejinta khiyaarka ah	-	-	-
4.1.3	" kale ee joogtada ah	-	-	-
		1.000.000	1.000.000	-

(BOGGA 2AAD)

MALAX MIISAANIYADEED	DAKHLIGA			KHARASHKA			FARAQA DHAN	
	1980 KU NOQOSHADA Qiyaasta	1981 Qiyaas	FARAQ	1980 Ku Noqoshada Qiyaasta	1981 Qiyaas	FARAQ	1980	1981
2.3.4 D.H. Q/DHEERE	357.000	446.000	+ 89.000	759.000	785.000	+ 26.000	-- 402.000	-- 339.000
ISUGEYN	3.360.000	4.565.000	+ 1.205.000	6.052.000	6.574.000	+ 522.000	-- 2.692.000	-- 2009.000
2.4.0 GOBOLKA BAKOOL	--	--	--	393.000	489.000	+ 96.000	-- 393.000	-- 489.000
2.4.1. D.H. XUDUR	390.000	392.000	+ 2.000	743.000	919.000	+ 176.000	-- 353.000	-- 527.000
2.4.2. D.H. WAAJID	173.000	189.000	+ 16.000	612.000	740.000	+ 128.000	-- 439.000	-- 551.000
2.4.3. D.H. YEED	237.000	275.000	+ 38.000	430.000	659.000	+ 229.000	-- 193.000	-- 384.000
2.4.4. D.H. C/BERDE	235.000	286.000	+ 51.000	574.000	726.000	+ 152.000	-- 339.000	-- 440.000
2.4.5. D/H. TIYEGLAW	139.000	179.000	+ 40.000	469.000	662.000	+ 193.000	-- 330.000	-- 483.000
ISUGEYN	1.174.000	1.321.000	+ 147.000	3.221.000	4.195.000	+ 974.000	--2.047.000	--2.874.000
2.5.0 GOBOLKA GEDO	--	--	--	262.000	1.002.000	+ 740.000	-- 262.000	--1.002.000
2.5.1. D.H.G/HARREBY	133.000	194.000	+ 61.000	447.000	1.025.000	+ 578.000	-- 314.000	-- 831.000
2.5.2. D.H. LUUQ	387.000	310.000	-- 77.000	950.000	980.000	+ 30.000	-- 563.000	-- 670.000

(BOGGA 3AAD)

DAX MIISAANIYADEED	D A K H L I G A			K H A R A S H K A			FARAQ DHAN	
	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980	1981
2.5.3.D.H. DOOLOOW	181.000	65.000	- 116.000	416.000	647.000	+ 231.000	- 235.000	- 582.000
2.5.4.D.H. B/XAAWO	907.000	1.050.000	+ 143.000	907.000	1.050.000	+ 143.000	-	-
2.5.5.D.H. C/WAAQ	450.000	278.000	- 172.000	450.000	584.000	+ 134.000	-	- 306.000
2.5.6.D.H. B/DHEERE	894.000	1.417.000	+ 523.000	894.000	1.417.000	+ 523.000	-	-
ISUGEYN	2.952.000	3.314.000	+362.000	4.326.000	6.705.000	+2.379.000	-1.374.000	-3.391.000
5.0.GOBOLKA SH/HOOSE	-	-	-	350.000	497.000	+ 147.000	- 350.000	- 497.000
2.6.1.D.H. MARKA	2.128.000	3.000.000	+ 872.000	2.098.000	2.757.000	+ 739.000	+ 110.000	+ 243.000
2.6.2.D.H. BARAAWE	676.000	1.171.000	+ 495.000	926.000	1.543.000	+ 617.000	- 250.000	- 372.000
2.6.3.D.H. QORYOOLEY	1.600.000	1.900.000	+ 300.000	1.560.000	1.750.000	+ 190.000	+ 40.000	+ 150.000
2.6.4.D.H. AFGOOYE	1.763.000	2.000.000	+ 237.000	1.763.000	2.000.000	+ 237.000	-	-
2.6.5.D.H. W/WEYN	890.000	1.025.000	+ 135.000	1.000.000	1.025.000	+ 25.000	- 110.000	-
ISUGEYN	7.057.000	9.096.000	+2.039.000	7.617.000	9.572.000	+1.955.000	- 560.000	- 476.000

(BOGGA 4AAD)

DAX MIISAANIYADEED	D A K H L I G A			K H A R A S H K A			F A R A Q D H A N	
	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980	1981
7.0 GOBOLKA SH/DHEXE	-	-	-	569.000	690.000	+121.000	-569.000	- 690.000
2.7.1.D.H. JOWHAR	2.190.000	2.495.000	+305.000	2.190.000	2.495.000	+305.000	-	-
2.7.2.D.H. BALCAD	790.000	1.086.000	+296.000	990.000	1.531.000	+541.000	-200.000	-445.000
2.7.3.D.H. A/YABAAL	177.000	196.000	+ 19.000	645.000	614.000	- 31.000	-468.000	-418.000
2.7.4.D.H. CADALE	138.000	211.000	+ 73.000	427.000	882.000	+455.000	-289.000	-671.000
ISUGEYN	3.295.000	3.988.000	+693.000	4.821.000	6.212.000	+1.391.000	-1.526.000	-2.224.000
3.0 GOBOLKA HIIRAAN	-	-	-	632.000	1.216.000	+584.000	-632.000	-1.216.000
2.8.1.D.H. B/HEYNE	1.550.000	1.815.000	+265.000	1.550.000	2.321.000	+771.000	-	- 506.000
2.8.2.D.H. B/BURTE	520.000	620.000	+100.000	735.000	1.130.000	+395.000	-215.000	- 510.000
2.8.3.D.H. JALALAQSI	204.000	445.000	+241.000	319.000	1.084.000	+765.000	-115.000	- 639.000
ISUGEYN	2.274.000	2.880.000	+606.000	3.236.000	5.751.000	+2.515.000	-962.000	-2.871.000

(BOGGA 5AAD)

	DALILKA			KHAARAKA			FARAQ DHAN	
	1980 KU NOQASHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	FARAQ	1980 KU NOQASHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	FARAQA	1980	1981
0 OOLKA G/GUDUUD	-	-	-	174.000	926.000	+ 752.000	- 174.000	- 926.000
.9.1 D.H DH/MAREEB	643.000	763.000	+ 120.000	831.000	970.000	+ 139.000	- 188.000	- 207.000
.9.2 D.H C/DHEER	222.000	355.000	+ 133.000	582.000	620.000	+ 38.000	- 360.000	- 265.000
.9.3 D.H C/DUUR	318.000	398.000	+ 80.000	564.000	598.000	+ 34.000	- 246.000	- 200.000
.9.4 D.H C/WAAQ	926.000	770.000	- 156.000	999.000	846.000	- 145.000	- 65.000	- 76.000
.9.5 D.H CADAADO	402.000	712.000	+ 310.000	792.000	842.000	+ 50.000	- 390.000	- 130.000
ISUGEYNI	2.511.000	2.998.000	+ 487.000	3.934.000	4.802.000	+ 868.000	- 1.423.000	- 1.804.000
0 COBOLKA MUDUG	-	-	-	1.066.000	1.025.000	- 41.000	- 1.066.000	- 1.025.000
2.10.1 D.H G/KACYO	958.000	1.598.000	+ 640.000	1.341.000	1.956.000	+ 615.000	- 383.000	- 358.000
2.10.2 D.H X/DHEERE	161.000	222.000	+ 61.000	484.000	455.000	- 29.000	- 323.000	- 233.000
2.10.3 D.H HOBYO	297.000	370.000	+ 73.000	498.000	397.000	- 101.000	- 201.000	- 27.000
2.10.4 D.H JARIBAN	156.000	174.000	+ 18.000	724.000	735.000	+ 11.000	- 568.000	- 561.000
2.10.5 D.H G/DOGOB	181.000	458.000	+ 277.000	862.000	1.080.000	+ 218.000	- 681.000	- 622.000
ISUGEYNI	1.753.000	2.822.000	+ 1.069.000	4.975.000	5.648.000	+ 673.000	- 3.222.000	- 2.826.000

(BOGGA 6AAD)

DAX IISAANIYADEED	D A K H L I G A			K H A R A S H K A			F A R A Q D H A N	
	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980	1981
11. GOBOLKA NUGAAL	-	-	-	313.000	399.000	+ 86.000	- 313.000	- 399.000
2.11.1.D.H. GAROOME	461.000	489.000	+ 28.000	1.099.000	1.036.000	- 63.000	- 638.000	- 547.000
2.11.2.D.H. EYL	159.000	175.000	+ 16.000	463.000	486.000	+ 23.000	- 304.000	- 311.000
2.11.3.D.H. L/CAANOD	544.000	583.000	+ 39.000	644.000	844.000	+200.000	- 100.000	- 261.000
2.11.4.D.H. TALEEX	126.000	144.000	+ 18.000	463.000	622.000	+159.000	- 337.000	- 478.000
ISUGEYN	1.290.000	1.391.000	+101.000	2.982.000	3.387.000	+405.000	-1.692.000	-1.996.000
12. GOBOLKA BARI	-	-	-	293.000	332.000	+ 39.000	- 293.000	- 332.000
2.12.1.D.H. BOSAASO	365.000	467.000	+102.000	685.000	817.000	+132.000	- 320.000	- 350.000
2.12.2.D.H. QARDHO	260.000	320.000	+ 60.000	622.000	761.000	+139.000	- 362.000	- 441.000
2.12.3.D.H. B/BEYLA	131.000	142.000	+ 11.000	392.000	423.000	+ 31.000	- 261.000	- 281.000
2.12.4.D.H. ISK/BAN	624.000	416.000	-208.000	645.000	780.000	+135.000	- 21.000	- 364.000
2.12.5.D.H. CALJULA	261.000	331.000	+ 70.000	436.000	565.000	+129.000	- 175.000	- 234.000
2.12.6.D.H. QANDALA	199.000	237.000	+ 38.000	446.000	569.000	+123.000	- 247.000	- 332.000
ISUGEYN	1.840.000	1.913.000	+ 73.000	3.519.000	4.247.000	+728.000	-1.679.000	-2.334.000

(BOGGA 7AAD

IAD. & MIISAANIYADEED	D A K H L I G A			K H A R A S H K A			F A R A Q A D H A N	
	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	FARAQ	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	FARAQ	1980	1981
13.0 GOBOLKA SANAAG	-	-	-	447.000	361.000	- 86.000	- 447.000	- 361.000
13.1 D.H CERIGAABO	1.000.000	1.600.000	+ 600.000	1.960.000	1.767.000	- 193.000	- 960.000	- 167.000
13.2 D.H BADHAN	249.000	302.000	+ 53.000	744.000	784.000	+ 40.000	- 495.000	- 482.000
13.3 D.H C/AFWEYIN	251.000	290.000	+ 39.000	730.000	816.000	+ 86.000	- 479.000	- 526.000
ISUGEYIN	1.500.000	2.192.000	+ 692.000	3.881.000	3.728.000	- 153.000	-2.381.000	- 1.536.000
14.0 GOBOLKA TOGDHEER	-	-	-	1.080.000	1.570.000	+ 490.000	-1.080.000	- 1.570.000
14.1 D.H BURCO	4.586.000	5.806.000	+ 1.220.000	4.526.000	5.606.000	+ 1.080.000	+ 60.000	+ 200.000
14.2 D.H SHEEKH	540.000	846.000	+ 306.000	818.000	1.232.000	+ 414.000	- 278.000	- 386.000
14.3 D.H OODWEYNE	897.000	927.000	+ 30.000	897.000	927.000	+ 30.000	-	-
14.4 D.H BUUHOODLE	687.000	695.000	+ 8.000	687.000	902.000	+ 215.000	-	- 207.000
ISUGEYIN	6.710.000	8.274.000	+ 1.564.000	8.008.000	10.237.000	+ 2.229.000	-1.298.000	- 1.963.000

(BOCGA ƔAAD)

DAA MIISAANIYADEED	D A K H L I G A			K H A R A S H K A			F A R A Q D H A N	
	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980 KU NOQOSHADA QIYAASTA	1981 QIYAAS	F A R A Q	1980	1981
5.0 WOBOLKA W/GALBEED	-	-	-	2.730.000	3.167.000	+ 437.000	-2.730.000	-3.167.000
2.15.1.D.H. HARGEYSA	13.733.000	15.600.000	+1.867.000	11.653.000	13.360.000	+1.707.000	+2.730.000	+2.240.000
2.15.2.D.H. BERBERA	4.200.000	5.000.000	+ 800.000	3.665.000	4.187.000	+ 522.000	+ 535.000	+ 813.000
2.15.3.D.H. LUGHAYO	193.000	272.000	+ 79.000	500.000	520.000	+ 20.000	- 307.000	- 248.000
2.15.4.D.H. SEYLAC	800.000	1.000.000	+ 200.000	800.000	1.056.000	+ 256.000	-	- 56.000
2.15.5.D.H. BOORAMA	1.290.000	8.000.000	+ 710.000	1.290.000	2.000.000	+ 710.000	-	-
2.15.6.D.H. GABILEY	3.880.000	5.000.000	+1.120.000	3.765.000	4.886.000	+1.121.000	+ 125.000	+ 114.000
ISUGEYH	24.096.000	28.872.000	+4.776.000	24.403.000	29.176.000	+4.773.000	- 307.000	- 304.000
6.0 WOBOLKA J/DHEXE	-	-	-	305.000	410.000	+ 105.000	- 305.000	- 410.000
2.16.1.D.H. BU'AALE	238.000	419.000	+ 181.000	518.000	810.000	+ 292.000	- 280.000	- 391.000
2.16.2.D.H. JILIB	530.000	880.000	+ 350.000	814.000	1.208.000	+ 394.000	- 284.000	- 328.000
2.16.3.D.H. SAAKOW	306.000	444.000	+ 138.000	601.000	722.000	+ 121.000	- 295.000	- 278.000
ISUGEYH	1.074.000	1.743.000	+ 669.000	2.238.000	3.150.000	+ 912.000	-1.164.000	-1.407.000
ISUGEYH DHAN	147.335.000	193.842.000	+46.507.000	169.971.000	222.269.000	+52.298.000	-22.636.000	-28.427.000